
Somali | Soomaali

LOGAN WEST UPGRADE

Transurban

Bisha Agoosto ee sanadka 2026



Transurban waxay la shaqeyn doonaan Dowladda Queensland si ay isula qorsheeyaan dayactir lagu sameynayo masaafo dhan ilaa 10km oo ka tirsan Waddada Weyn ee Logan (Logan Motorway)—inta u dhaxaysa Waddada Weyn ee Ipswich (Ipswich Motorway) iyo Waddada Weyn ee Mount Lindesay (Mount Lindesay Highway)—si loo dedejiyo socdaalka, loo yareeyo ciriiriga gaadiidka, loona wanaajiyo badbaadada waddooyinka.

Waxaan diyaarinay naqshadda tixraaca ee mashruuca lagu dayactirayo Logan West. Naqshaddan waxaa lagu saleeyay fikradihii ay nala soo wadaageen bulshada dabayaaqadii sannadkii 2024-kii.

Naqshadeennu ma dhammaystirna. Naqshadeena way isbeddeli kartaa marka la xaqiijiyo shirkada qandaraaska la siiyay.

Waa maxay naqshad tixraac ah (reference design)?

Naqshada tixraac ah ayaa muujinaysa naqshadda la soo jeediyay ee hagaya mashruuca hadda socda. Ma aha naqshadda kama dambaysta ah.

Faa'iidooyinka mashruucan

Safarkii ayaa wuxuu yaraanayaa ilaa 20 daqiiqo marka mashruucu dhammaado

Baabuurta maraysa wadooyinka xaafadahana way kala yaraanayaan

Wadooyinkuna waxay gawaarida waaweyn u noqon doonaan kuwo ka amni fiican sidii hore

Shaqooyin ayaa abuurmaya

* Waqtiyadan hada la qorsheeyay waa kuwo ay wax iska badeli karaan

loganwestupgrade.com

Operator of Linkt

Waxyaabihii aan ogaanay

Markii aad nala wadaagteen fikradihiina waxaan ogaanay:

Gadiidka wadada kusoo badanaya ayaa dhibaato weyn ah

Waddooyinka maxalliga ah ee ku xirma wadada weyn (motorway-ga) ayaa u baahan in la hagaajiyo

Waddada weyn (motorway-ga) meelaha laga koro iyo meelaha looga dego waa in ammaankooda la hagaajiyaa

Gaadiidka waaweyn iyo adeegyada gurmadka degdegga ah waxay u baahan yihiin inay helaan wadooyin fiican oo ay ka geli karaan

Muhiimada ay leedahay in la maareeyo saameynta shanqarta/ buuqa iyo deegaanka

Sidii aan uga falcelinay

Waxaan dib u eegis ku sameynay ra'yiga bulshada, shuruudaha farsamo iyo mabaadi'da naqshadeynta ka hor inta aanan diyaarin naqshadda tixraaca ah.

Dad badan ayaa noo sheegay inay doonayaan in safaradoodu noqdaan kuwo ka dhaqsi badan kana badbaado fiican sidii hore. Mashruuca Lagu DayactirayoLogan West wuxuu diiradda saarayaa qaybaha waddada weyn ee ay gawaaridu ku badan tahay taasoo dhibaato keentay.

Muhiimadu waxay tahay, naqshadeena waa mid la hirgelin karo iyada oo aan dawladu la wareegayn hanti gaar ah. Tan micnaheeda waxay tahay inay bulshada ka faaiidayaan safaro qaata wakhti ka yar safaradii hore, kana badbaado badan kuwii hore Iyada oo aan la wajahayn carqalad ka dhalata la-wareegidda hantida gaarka ah.

Fikradaha qaar sida waddooyinka baaskiillada iyo dayactir kan kasii weyn kuma aysan jirin qorshaha markan, balse waan gudbinay si looga baaraandego qorsheynta mustaqbalka.

Waxaan ognahay in dhaxalka dhaqanku uu muhiim yahay. Waxaan la shaqeyn doonaa dadka Dhaqan Ahaan Dhulka leh si loo xushmeeyo goobaha dhaqanka iyo qiimaha hidaha. Shaqadani way sii socon doontaa inta uu mashruucan socdo.




Dhaxalka bulshada

Bulshooyinka maxalliga ah taageerada aan siino kuma eka dhismaha waddooyinka. Mashruucan, waxaan ku bixin doonnaa deeqo bulsho si aan u caawinno kooxaha maxalliga ah inay horumariyaan deegaankooda.


Macluumaad dheeraad ah ayaa la bixin doonaa marka la bilaabi rabo howlaha dhismaha.

Iyadoo ay na hagayaan fikradaha ay bulshadu nala wadaagtay, waxaan soo jeedinaynaa isbeddellada soo socda in lagu sameeyo waddada weyn ee Logan Motorway:




Waddooyin/leeman dheeraad ah oo ay baabuurtu marto in lagu daro

Wadooyin/leeman dheeraad ah oo labada dhinac ah oo laga hirgalinayo inta u dhexeeysa Centenary Motorway iyo Mount Lindesay Highway.




Dayactir lagu sameynayo meelaha laga koro ama looga dego wadooyinka kor aada

Dayactir lagu sameynayo qaar ka mid ah meelaha laga koro ama looga dego wadooyinka kor aada.




Gaadiidka culus iyo gaadiidka gurmadka degdegga ah

Meelo fiican oo ay ka gali karaan dadka bixiya adeegyada gurmadka degdegga ah.




Maareynta shanqarta/buuqa

Waxaa la eegi doonaa shanqarta meesha ka jirta sida ay tahay si looga dhigo mid macquul ah.




Wadooyinka wareega ah (roundabouts)

Qaar ka mid ah wadooyinka wareega ah (roundabouts) oo la yareyn doono ama dhulka lala simi doono si ay gawaarida waaweyn u maraan meesha ayagoon wax dhibaato ah kala kulmin.




Garbaha wadada weyn (motorway shoulders)

Waxaa la balaarinayaa dhinacyada wadada weyn (motorway ga) si ay ugu sahlanaato gaadiidka bixinaya gurmadka degdega ah.



Hagaajinta tayada biyaha

Maareynta tayada biyaha iyadoo la adeegsanayo kanaallo biyo-mareenno caws leh.



Sida looga taxadari doono xayawaanka duurjoogta ah

Siligyada ama deyrka hada ku wareegsan meelaha ay xayawaanka duurjoogta ah ku nool yihiin waa la dhaafayaa iyadoona deyr kale la dhisi doono.



Tiknoolajiyadda casriga ah

Tiknoolajiyad casri ah oo loogu talagalay wadooyinka waaweyn (motorway) si toos loola socdo waxa ka dhacaya wadada weyn.

Cabirka wadada kor aada (ramp metering)

Cabirka wadada kor aada (ramp metering) waa nalalka taraafikada ee laga hirgaliyay waddooyinka laga soo galo wadada weyn ee la isticmaalo waqtiyada mashquulka ah si gawaarida mareysa wadada weyn loo socodsiiyo loona yareeyo khatarta shilalka.

Waxaan rabnaa inaan cabirka wadada kor aada (ramp metering) ka hirgelino dhammaan meelaha laga galayo wadooyinka kor aadaya ee ku yaal meelaha uu mashruuca ka socdo.





1

Laydhadh taraafik oo cusub ayaa laga hirgeliyay meesha laga galo waddada Brisbane Road ee dhinaca bari aadeysa.

2

Meesha looga dego Brisbane Road iyo meesha laga galo Formation Street ayaa la isku dari doonaa waxayna noqon doontaa mid gooni ka ah wadada weyn ee motorway-ga ah.

3

Waxaa la dayactiri doonaa wadada wareega ah (roundabout ka) ee ku taal Formation Street.

4

Meelaha wareega ah (roundabout yada) oo la yareyn doono si ay gawaarida waaweyn u maraan dhib la'aan.

5

Labo waddo ayaa dhanka galbeed aadeysa inta u dhaxeyso Boundary Road iyo Formation Street.

6

Waxaa la badeli doonaa meelaha laga galo Skepper Street marka laga imaanayo Boundary Road.

7

Wadada ka baxda Boundary Road ee dhanka galbeedka u jeedda ayaa laga dhigi doonaa laba saf/leen halkii ay ka ahayd hal saf/leen. Calaamado cusub ayaa u oggolaan doona labada waddo inay midig u leexdaan.

8

Labo waddo oo dhanka bari u aadeysa oo ah inta u dhaxeysa Boundary Road iyo Centenary Highway.

9

Saddex leen/wadooyin ayay labada dhinacba yeelan doonaan inta u dhaxeysa Centenary Highway iyo Mount Lindesay Highway.

10

Waddo cusub oo u leexanaysa Stapylton Road (dhanka bari u jeedda) iyo waddo dheeraad ah oo laga soo galo goobta wareegga (roundabout) marka laga imaanayo waddada laga baxo (dhanka galbeed u jeedda).

11

Waddo/leen dheeraad ah oo aadeysa dhanka galbeed ee Mount Lindesay Highway. Labada waddo/leen way isku darmi doonaan waxayna galaysaa Logan Motorway.

Goobaha ay baabuurta waaweyni ka gudbaan iyo meelaha dheeraadka ah ee ay adeegyada gurmadka degdegga ahi kasoo kala wareegi karaan.

Meelaha dheeraadka ah ee adeegyada gurmadka degdegga ah ay kasoo geli karaan.

Wadooyin cabir leh (ramp metering) ayay noqon doonaan dhammaan wadooyinka kor aada ee soo galaya si loo wanaajiyo dhaqdhaqaaqa baabuurta.

Dhismaha iyo casriyeynta guud, oo ay ku jirto tiknoolajiyadda waddooyinka waaweyn ee casriga ah (smart motorway).

Aagga mashruuca dayactirka ee Logan West


Khariidadda sare waxay muujinaysaa sida aan u doonayno inaan u horumarinno Waddada Weyn ee Logan (Logan Motorway) iyada oo qayb ka ah naqshadda tixraaca.

Naqshaddani maaha mid kama dambeys ah waana ay isbeddeli kartaa marka lagu dhawaaqo shirkada heshay qandaraaska.

1

Waddada laga galo Brisbane Road*


Calaamadaha taraafikada cusub ee ku yaal Brisbane Road oo u dhow Logan Motorway oo ku taal bariga iyo cabbirka wadada kor aadeysa si loo yareeyo ciriiriga loona wanaajiyo amniga waddooyinka.



2

Wadada kor aadeysa ee Formation Street iyo Brisbane Road/Viking Drive*

Waa la kala reebi doona Brisbane Road dhanka galbeed ee aadeyda Formation Street kana imaanaysa motorway-ga. Taasi waxay sahli doontaa meel nafaas ah oo ay baabuurta kasoo geli karaan, waxayna gacan ka geysan doontaa in gaadiidku si wanaagsan u qulqulo.



6

Skepper Street*


Meesha laga soo galo Skepper Street marka laga imaanayo dhanka Logan Motorway ayaa laga xiri doonaa gaadiidleyda si loo wanaajiyo amniga waddada. Dadka ku nool Skepper Street waxay isticmaali doonaan Michael Street ama Stephen Street si ay u galaan.

7

Boundary Road*

Wadada laga soo galo Boundary Road ee dhanka bari ka imaanaysa waxay yeelan doontaa laba leen iyo nidaamka cabiri doona qulqulka baabuurta (ramp metering).

Calaamado/nalal cusub oo gawaarida hagaya ayaa laga hirgelin doonaa isgoyska waddada ka baxda Boundary Road ee aadeysa dhanka galbeed. Waxaad sidoo kale u leexan kartaa dhinaca midig markaad saaran tahay leenka bidix.




* Naqshadda aan tixraaca u isticmaalno waa mid tilmaame uun ah waana mid wax laga badali karo oo loo baahan yahay in la ansixiyo. Naqshad faahfaahsan ayaa la diyaarin doonaa marka lagu dhawaaqo shirkada la siiyay qandaraaska.

Marxaladaha muhiimka ah ee mashruuca*

- **Luulyo ee sanadkii 2024**
  Mashruuca ayaa lagu dhawaaqay bishii
- **Bishii Oktoobar ee sanadkii 2024**
  Waxaa la bilaabay in bulshada laga qeybgeliyo howlahan
- **Bishii Diseembar ee sanadkii 2024**
  Waxaa la dhameeyay ka qeybgelintii bulshada lagaga qeyb gelinayay howlahan
- **Bishii Nofeembar ee sanadkii 2025**
  Waxaa la soo saaray qandaraaskii naqshadaynta iyo dhismaha.
- **Bishii Ogosto ee sanadka 2026**
  Waxaa lasoo saaray naqshadda tixraaca

  WAXAAN HALKAAN JOOGNAA
- **Bartamaha ilaa dhammaadka sanadka 2026**
  Wadatashi ku saabsan arrimaha deegaanka
- **Bilowga ilaa bartamaha sanadka 2027**
  Naqshadda kama-dambaysta ah ayaa la soo saari doonaa
- **Bartamaha sanadka 2027**
  Ansixinta mashruuca ee ay Dowladda Gobolku ansixin doonto
- **Bartamaha ilaa dhammaadka sanadka 2027** Dhismaha ayaa bilaabmaya.
- **Inta aan la gaarin sanadka 2032**
  Howlaha dhismaha ayaa la dhameystiri doonaa

* Taariikhaha way isbeddeli karaan.



Waad mahadsan tihiin

Ra'yigii aad nala wadaagteen ayaa xoojiyay mashruucan. Waad ku mahadsan tihiin sidaad nooga caawiseen inaan qaabeyno mustaqbal wanaagsan oo oo aan la doonayno bulshadeena.

Is-diiwaangeli si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay:
transurban.com/loganwestupgrade



Saamaynta ay waxan oo dhan ku yeelan doonto deegaanka

Bulshadu waxay noo sheegtay in deegaanku uu muhiim u yahay. Waxaan diyaarinaynaa warbixin ku saabsan deegaanka si aan u sharraxno sida aan u tixgelin doonno saameynta deegaanka.

Booqo mareegta mashruuceena si aad isu diiwaangeliso oo laguula soo socodsiiyo wixii soo cusboonaado.

Iskaan si aad xog dheeraad ah u hesho.

Nagala soo xiriir

loganwestupgrade@transurban.com
1800 LOGANW (1800 564 269) Saacadaha khadka tooska ah 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo AEST.

loganwestupgrade.com
Ma u baahan tahay turjubaan? Wac 131 450